# Xuquuda Dhibbanaha Dambiga

## Xuquuqda la is Ogaysiinayo

- Xuquuqda dhibbanaha dambiga iyo macluumaadka ee barnaamijka kaalmada dhibbanaha dambiga ugu dhow ama ilaha.
- Xaqa loo leeyahay in la codsado magdhow (cawil-celinta lacageed) ee ku saabsan khasaare hantiyeed ee la xariira rabshad dambi lagu galay.
- Habraaca dambi-oogista iyo xaqa loo leeyahay in laga qaybqaato.
- Waxyaabaha ku jira heshiiska dacwadda dambiga lagu taliyay.
- Isbaddalka ku yimaadka dhagaysiga jadwalka haddii qofka loo yeeray ama la weydiistay in uu marag furo.
- Xaqa codsiga cawilcelinta.
- Natiijada dacwadda.
- Racfaanka, xaqa ka qaybgalka la xariira dhagaysiga, iyo xaqa in la soo ogaysiiyo natiijada racfaanka.
- Soo-jeedinta wax ka baddalka nidaamka/xukunka eedaysanaha, oo ay ku jiraan taariikhda, waqtiga, iyo goobta dib loogu eegayo dhagaysiga iyo xaqa lagu helayo xogta uruursan.
- Ka siidaynta ama ka baxsiga eedaysanaha xabsiga ama hay'ad dad meel ku haysa ama loo baddalo rug ammaana oo llaalinteedu hoosayso.
- Codsiga dambi tirtiridda dambiilaha.

## Xaqa ka Ilaalinta Waxyeellada

- Xaqa in la weydiisto hay'adaha sharci fulinta in ay ilaaliyaan aqoonsigaada gaarka warbixinnada dadweynaha u diyaarka.
- Xaqa goob sugitaan oo ammaana ama looga ilaalnayo eedaysanaha iyo taageerahiisa/heeda muddada dacwaddo socoto.
- Xaqa in la soo wargeliyo markhaatiga dadka dhex-socda ama xadgudbyadaa amarrada ah in aanu xiriir la yeelan ama xakamaynta.
- Xaqa lagu codsanayo gurigaas iyo cinwaanka shaqada, lambarada telefoonada, iyo taariikhda dhalashada oo ay tahay in lagu hayo eedaysanaha iyo maxkamad dadweynaha u furan.
- Ilaalinta in loo-shaqeeyaha ka aarguto dhibbanayaasha ama xubinta/naha qoyska iyado qaadanaya waqti caqligala oo looga qaybqaadanayo dhagaysiga ama laga marag furo dacwadaha dambiyada rabashka.

### QEEXIDDA DHIBBANAHA

Sida uu qabo sharciga Minnesota, dhibbanaha dambiga waxaa lagu sheegi karaa qofka geysta khasaare ama dhibaato taasoo dambi sababta. Dhibbanaha waxaa ku jira xubinta qoyska, ilaaliyaha sharciga, ama qofka haya da'yaraha, aan awoodda lahayn lahayn awood maskaxeed ama jireed, ama qof geeriyooday.

Minnesota Statutes section 611A, subdivision 1

## Xaqa ka Qaybgalka Dacwa-Oogista

- Xaqa ah in la weydiisto xeer ilaaliyaha dedejinta dacwaddda.
- Xaqa lagu helayo xogta ururs an ee go'aamada weecsan ee dacwadda horteed.
- Xaqa ogaysiiska iyo ka qayqaadashada dacwadda iyo nidaamka dhegaysiyada.
- Xaqa horstaagga soo-jeedinta heshiiska dacwadda ee dhagaysiga dacwadda.
- Xaqa lagu siinayo dhibbanaha in uu bixiyo caddayn afka ama qoraal saamayntiisa leh marka dacwadda la diyaarinayo ama marka dhagaysiga xukunka uu dhacayo.

## Xaqa lagu Dalbanayo Kaalmada Dhaqaalaha

- Dhibbanayaasha dambiyada rabashka waxay dalban karaan magdhow lacageed (cawl-celinno) aan ahayn khasaaraha hantiyeed ee la xariira dambiga rabashaka/dagaalka.
- Dhibbanyaashu waxay ka codsan karaan garsooraha in uu ku amro eedaysanaha in uu bixiyo magdhowga marka lagu helo eeddaysanha dhaqan xumida.
- Dhibbanayaashu waxay codsan karaan in la muddeeyo dhagaysiga xadgudubka seeta-dheeraynta haddii aan la bixin magdhowga.

## Rabashka Guriga, Kufsiga & Dabagalka Dhibbanayaasha

- Xaqa ah in la wargeliyo xeer ilaaliyaha go'aan kasta oo dhimaya ama meesha ka saaraya kiiska marka la haysto macluumaadka lagu raadsanayo amarka ilaalinta ama handadaadda amarka xakamaynta oo kharash la'aana.
- Ilaalinta liddiga aargudasha loo-shaqeeyaha ee ku saabsan dhibbanayaasha haysta waqti firaaqo caqligala oo ay uga qaybqaataan habraacyada amarka ilaalinta ama xakamaynta handadaadda.
- Xaqa lagu soo afjarayo ruqsadda aan lahayn ganaax ama bixin lacageed si looga fakado xalad dagaal ama arbush.
- Haddii dhibbanaha rabashka guriga, uu ku helo nuqulka kharsh la'aan warbixinta shilka hay'adda fulinta caddaaladeed ee ka jawaabaysa waxaa looga fadhiyaa in ay qoraal keento.
- Dhibbanaha kufsiga iyo dhibbanayaasha rabashka qaarkood waxay samayn karaan codsiga dhowrsan ee ku saabsan baarista HIV oo lagu sameeyo haddii eedaysanaha lagu helo dhaqan xumida.
- Dhibbanaha kufsiga wuxuu xaq u leeyahay in in si dhowrsan lagu sameeyo baarista kufsiga oo kharsh la'aana iyo in uu ka helo xuquuqda ogaysiiska iyo ilaha rugaha caafimaadka.
- Dhibbanayaasha kufsiga waxay diidi karaan baarista run-sheegidda iyadoo aanu saamaynayn ku reebayn haddii baarista ama dacwa oogistu sii socon doonto.

# Macluumaadka Guud

*Sidee ku heli karaa macluumaadka kiiska ku saabsan?*

Ka wac iskuduwaha dhibbanaha markhaatigs xaafiiska xeer ilaaliyaha degmada marka dambiga dhacay ay ka jiraan su'aalo ku saabsanhabraaca, macluumaadka xaaladda kiiska, iyo taariikhaha maxkamadda maalmaha soo socda.

Intaas waxaa dheer xuquuqda dhibbanaha dambiga ee ku taxan qoraalka gaaban, dhibbanaha dambiga kurayga kiiska xadgudubka wuxuuu xaq u yeelanayaa in uu helo macluumaadka ku saabsan kurayga: magac iyo da'da kurayga, falka lagu eedeeyay, taariikhda dambigu dhacay, iyo natiijada kiiska ka soo baxda.

*Dacwaddaan maxkamadda ma la geyn karaa?*

Sida kiisaska qaangaarada oo kale, kiisas yar ee kurayada ayaa maxkamaddu qaadi kartaa. Dacwadaha intooda badan waxaa lagu xalliyaa is-afgarad uu kuraygu ku qirto falka dambiga iyadoo eedda dambiga lagala noqonayolana maxkamaddana la siinay talooyin cayiman oo ku saabsan nidaam habboon ee waafqasan duruufaha kiiska.

*Waa sidee haddii aan helo wicitaan maxkamadeed ama markhaati la iigu yeero?*

Yeeritaanka maxkamaddu waa amar ah in maxkamadda la horyimaado. Si taxaddara u akhri. Waxaa ku jiri kara awaamir la iska rabo ee la xariira macluumaadka taariikhda, waqtiga, iyo goobta dacwadda lagu qabanayo. Sikastaba, haddii aad haysato jadwal is-khilaafsan ama aad qabto su'aalo, wac cidda soo dirtay yeeritaanka. Haddii aad tahay markhaati, waxaad heli doontaa ujro yar ee la xariirta waqtiga iyo masaafada aad ka timid.

*Yaa ka soo qaybgeli kara dhageysiga maxkamadda?*

Guud ahaan, dadweynuhu kama soo qaybgali karaan maxkamadaynta kurayada, marka laga reebo mararka muhiimka ah:

- Dhibbane kasta ee fal-dambiyeed waa ka soo qaybgeli karaa dhagaysiga maxkamadda, sikastaba, waa laga reebi karaa haddii la baarayo macluumaad looga doodayo arrimaha la xariira dareenka nafsiyeed ee kurayga.
- Qofka "kiiska ka leh dan toosa" waa ka soo qaybgali karaa dhageysiga maxkamadda haddii ay maxkamaddu u garato.
- Dadweynahu waa ka soo qaybgeli karaan kiisaska kurayada loo haysto ama lagu caddeeyay in ay galeen dambiyo culus iyo ugu yiraan 16 jir ah waqtiga ay dambiga galeen.
- Dhibbanahu wuxuu xaq u leeyahay in uu yeesho caawiya inta uu maxkamdda joogo marka uu marag furayo.

*Waa sidee haddii uu isoo gaaro khasaare uu dambiga sababay?*

Haddii kurayga eedaysanaha ah u dambiga qirto ama lagu helo dambiga in uu galay, garsooruhu wuxuu amri karaa in uu siiyo dhibbanaha magdhaw. Magdhowgu waa lacag fal-dambiyeedku sababay oo qofka lagu leeyahay, waxaana ku jira kharashaadka daawada, mushaarka baaqday, iyo khasaaraha hantiyeed ama dhibaatada soo gaartay. Xaafiiska xeer ilaaliyaha degmada ama waaxda seeta-dheeraynta (probation) waxay siin doonta foom la buuxiyo oo lagu muujiyo lacagta laga doonayo in uu bixiyo.

Waxaa intaas sii dheer, in aad u qalantid in magdhow aad ka hesho Gobolka Minnesota haddii aad tahay dhibbane dambi rabashka/dagaal iyo aad leedahay kharashka lacagta qofka laga doonayo ee ee la xariira waxyaabaha sida daryeelka caafimadka, la-talinta, duugta, ama mushaarka baaqday. Waxaa kaloo xarayn kartaa dacwad magdhow xitaa kiiska kuraygu haddii uu weli ka socdo maxkamadda. Macluumaadka ku saabsan barnaamijka magdhowga waxaa laga heli karta barta internetka: ojp.dps.mn.gov or call ama iyadoo la waco telefoonka 1-888-622-8799.

*Sidee ku ogaan doonaa marka dambiiluhu uu ka soo baxo xabsiga?*

Dhibbanayaasha dambiga, oo ay ku jiraan dhibbanayaasha dambiyada ay galaan kurayada, waxa ay xaq u leeyihiin in la soo ogaysiiyo marka dambiilayaasha xabsiga ama goobaha dhaqan celinta laga siidaayo. Tallaaabadaas ka bacdi, dhibbanuhu waa in si toosa ku soo hagaajiyaha xabsiga codsi ah in la soo ogaysiiyo. Haddii xabsiyada qaangaarada, rugaha lagu hayo kurayada aanay ku xirnayn VINE, hannaanka ogaysiiska iswada (automatic) ee dhibbanaha.

Inkastoo macluumaadka intooda badan ee ku saabsan dambiilayaasha kurayada loo tixgalinayo dhowrsananta, haddana hay'adaha dhaqancelinta kurayda waxay u siidayn karaan dhibbanaha macluumaad gaara ama kuwa dhowrsan oo lagama maarmaan u ah ilaa xad hubinta xuquuqdooda ah in la soo ogaysiiyo siidaynta.

*Sidee u heli karaa nuqulka warbixinta boliiska?*

Dhibanayaasha doonaya in ay helaan nuqulka warbixinta ciidanka nabagalyada waa in ay codsi u soo qortaan xaafiiska xeer. Codsigaas waa la diidi karaa haddii xeer ilaaliyuhu rumaysanyahay in arrintaasu ay faragelin ku tahay baarista ama codsigaas codsigaas lala maaganyahay hawlo sharci darro ah. Qeexidda macluumaadka ku jira warbixinta markhaatiga kurayga ayaa meesha laga saari karaa. Dacwadaha dambiyada culus ee ay galaan dambiilayaasha ugu yaraan da'dootdu tahay 16 jir, dhibbanayaashu waxay heli karaan in la siiyo nuqulka warbixinta marka kiiska la gunaanado.

# Shuruudaha Maxkamadda Kurayada

## AKHLAAQ XUMIDA

Akhlaaqxumidu waa arrin uu sameeyo kuray kaasoo dambi noqonaya haddii uu ku kaco qof 18 sano jira. Kurayga waxaa dacwadda lagu "qaadayaa"marka dacwo laga keeno oo lagu eedayo kurayga akhlaaq xumida. Marka kuryga lagu qaado dambiga, habraacyada sharciga macna ahaan waa ay ka duwantahay hababka loo adegsado qaangaarada.

## XARIGGA

Kurayo la soo qabtay iyo dambiyo loo soo xiray waa la hayn karaa. Sarkaalka wax soo xiraya wuxuu u siidayn karaa kurayga waalidka ama ilaaliyaha, lagu meeleeyo kurayga hoy, ama xabsiga lagu sii hayo. Sharciga ayaa shardi ka dhigayaa in kuraygaas xabsiga laga siidaayo haddii aanay jirin duruufo gaara. Kurayada intooda badan waa in makamadda hortooda yimaadaan 24 illlaa 48 saac gudahood dhagaysiga xarigga. Kuraya badan ee daambiyo galay lama xiro. Maxkamadda ayaa ugu diraya ogaysiis boostada loo dhigo.

## HABAYNTA

Inta lagu jiro habaynta dhagaysiga, kuraygu maxkamadda ayuu hortgayaa waxaana la weydiinayaa in uu dambiga loo haysto qirto ama dafiro. Kuraygu xaq waxa uu u leeyahay qareen, wuxuuna dalban karaa in qareen matala loo magacaabo. Marka uu dambiga qirto, dacwadda kurayga nidaam ayaa loo dirayaa, ha ahaado mid deg-degga ama mid ah mustaqbalka. Dafiraadda dambiga waxay horseedi doontaa in habab dheeraada oo dambe dacwaddu ay gasho.

## DHAGAYSIGA MAXKAMADAYNTA HORTEED

Garsoorka qaarkood, garsooruhu wuxuu amri karaa dhagaysi maxkamadaynta ka horreeya si uu go'aan uga gaaro arrimo sharcigu ku taxaluqa inta aan dacwadda la qaadin. Markhaatiyada muwaadininta (ay ku jiraan dhibbanayaasha) looguma yeero in dhegaysigaas ay ka furaan markhaati. Kuraygu wuxuu ku qiran karaa dhegeysigaas akhlaaq.

## MAXKAMADAYNTA

Maxkamadaynta kurayga waxay ka dhaceysa garsooraha hortiisa. Kurayga eedaysanha ah wuxuu leeyahay mid la mida xuquuqda ilaalinta sharciga inta maxkamaddu socoto sida qaangaar dambigaaaso kale lagu qaadayo. Garsooraha ama xeer-beegtida waxay go'aan ka gaarayaan eedda loo haysto in "la caddeeyay" ama in "aan la caddaynin". Haddii garsooruhu arko in dambigii lagu caddeeyay, kiisku wuxuu ku sii soconayaa nidaamka dhageysiga.

## GO'AANKA

Islamarka kurayga lagu helo akhlaaq xumida (inuu dambiga galay), waxaa la muddeeynayaa dhagaysiga dacwadda. Tanu waxay la mid tahay dhagaysiga xukunka ee maxkamadda qaangaarka. Garsooruhu wuxuu haystaa awood ballaaran oo lagu samaynayo barnaamijyada looga fakarayo kurayada, hasayeeshe aan ku koobnayn: samaynta digniinta, amaridda bixinta magdhowga dhibbanaha iyo/ama ganaaxyada, adeegyada bulshada, seeta-dheeraynta, ilaalinta elektronikada, xannaanada guriga, ka baxsan meelaynta guriga, ama xabsiga. Amarku wuxuu ku xirnaan doonaaa dambiga, taariikh-dambiyeedka kurayga, ama helitaanka adegyada ku habboon.

## WEECINTA

Eedaysanayaasha leh taariikh dambiyeed yar ama aan lahayn waxay u qalmi karaa barnaamij duwan marka ay dambiga qirtaan, hasayeeshe waxaa laga weecinayaa habka dacwad qaadoista maxkamadda. Taa baddalkeeda, waxa ay ka qaybgalayaan barnaamij ka kooban waxbarasho iyo dhaqancelin. Hadafku waa in loo abuuro eedaysanayaasha xaalado isbaddal ku keena, xaqiijinta magdhowga dhibbanayaasha, iyo eedaysanayasha in ay bulshada la qabsadaan. Eedaysanyaasha aan si guul leh u dhammaystirin barnaamijka weecinta, waxaa loo celin doona maxkamadda kurayada si ay uga jawaabaan dambiga loo haysto.

## BALLAARINTA GARSOORKA KURAYADA

Kiiisaska qaarkood oo ay ku lug leeyihiin eedaysanayaasha 14 illaa 17 jirka ah oo gala dambiaya badan oo culus, kiiskooda waxaa lagu qaadi karaa habka garsoorka ballaaran ee kurayga (EJJ). EJJ waa qaab la dooran karo oo lagu maamulayo kurayga gala dambiyada culus kuwaaso aanay ku haboonayn in loo warejiyo maxkamadda qaangaaarka. Kurayga ededaysanaha waxaa lagu qaadayaa nidaamka maxkamadda kurayga wuxuuna ku joogayaa xukun qof qaangaara oo kale (taaso macnaheedu yahay "in la haynayo"). Maxkamaddu waxay leedahay awoodda garsoor ee eedaysanayaasha kurayada illaa ay ka gaarayaanda 'da'da 21 jirka. Haddii kuraygu ku xadgudbo shuruudaha nidaamka maxkamadda kurayada ama uu galo dambiyo cusub, garsooruhu wuxuu ku qaadi karaa xukun qof qaangaara.

## LOO AQOONSADO SIDA QANGAARKA

Kurayga 14 illlaa 7 jirka oo gala dambiyo culus waxaa "loo aqoonsan karaa sida qof qaangaaraa", kiiskuna wuxuu ka baxaya garsoorka maxkamadda kurayga marka kiiska loo wareejiyo maxkamadda qaangaarka.

*Xuquuqda dhibbanaha dambiga ee Minnesota jooga waxaa lagu dhaqayaa dhibbanayaasha dambiyada ay geystaan kurayada iyo qaangaarada labadaba.*

# Ilaha

**United Way 211**

Graac 2-1-1 ama 1 800-543-7709 si aad lacag la'aan ugu wacdo 24ka saacadoodao iyo uga dirsato khad caaawinaadda macluumaadka dhowrsan.

www.211.org

**Minnesota Day One 24-Hour Crisis Line (Maalinnimada Minnesota 24ka Saac Khadka Mushkiladda)**

Macluumaad dhowrsan ilo loogu talagalay da' kasta oo idil oo ay la soo gudboonaato rabashka guriga, kufsiga, ama ka gancsiga dadka.

1-866-223-1111 • dayoneservices.org

**Macluumaadka lagu helayo amarka ilaalinta**

Goobta ay ku taallo maxkamadda/maamulka maxkamadda

**Magdhowga lacageed ee ku saabsan dhibbanayaasha dambiyada rabashka/dagaaalka**

Crime Victims Reparations Board
(Guddiga Cawilcelinta Dhibbanayaasha)
651-201-7300 • 1-888-622-8799

**Xuquuqda dhibbanayaasha, ilaha iyo adeegyada dhibanaha maxalliga**

ojp.dps.mn.gov

**Haddii aad tahay dhibbane ama markhaati oo aad rumaysantahay in lagu xadgudbay *xuquuqdaada dhibbanaha*, wac telefoonka:**

Crime Victim Justice Unit
(Cutubka Caddaaladda Dhibbanaha)
651-201-7310 • 1-800-247-0390 ext. 3

## Nagala Soo Xariir


Office of Justice Programs
(Xafiiska Barnaamijka Caddaaladda)
445 Minnesota Street, Suite 2300
St. Paul, MN 55101-1515

Iimeylka: dps.justiceprograms@state.mn.us
Shabakadda Internetka: ojp.dps.mn.gov

651-201-7300 Telefoonka Guud
888-622-8799 Telefoonka Lacagla'aanta
651-205-4827 TTY (Maaqalka Dadka Dhegaha Culus)
651-296-5787 Fakis


6-15



# Habka Maxkamadda Kurayada

## Xuquuxqda Dhibbanaha Dambiga iyo Macluumaadka

Xafiiska Barnaamijka Caddaaladda

WAAXDA AMMAANKA GUUD EE MINNESOTA